# FAAFINTA RASMIGA

الجريدة الرسمية

*DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND SOOMAALIYA*

لـولايـة أرض بـونـت الـصـومـال

Sannadka 2 aad     Garoowe,     23 Janaayo 2000     Lam. 1

**FAAFINTA BILWALBA KA SOO BAXDA**     جريدة الشهرية

Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee **Madaxtooyada** Dawlad Goboleedka Puntaland


---

Qiimaha : waa Sh.So- 10.000 lambar walba.**Rukunka** Sannadkii waa Sh.So.-170.000 dalaka gudihiisa,dibaddana waa Sh.So.500.000-**Rukunka** la waydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilowdaa 1da janaayo. Qiimaha qoritaanka F.R. halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So. 3.000 Rukunka iyo Qoritaanka waxaa la waydiistaa Qaybta Maamulka Faafinta Rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wasaaradda Maaliyadda.

---

## TUSMADA

### Qaybta Koowaad

### Sharci


- **Sharci Lam. 1** ee 23/01/2000, kuna saabsan nabadgelyada guud     Bogga. 1
- **Sharci Lam.2** ee 23/01/2000, kuna saabsan Horumarinta Daaqa     Bogga. 10
- **Sharci Lam.3** ee 23/01/2000, kuna saabsan dhulka Beeraha     Bogga 15
- **Sharci Lam. 4** ee 23/01/2000, kuna saabsan Anshaxa Falimada     Bogga. 21
- **Sharci Lam. 5** ee 23/01/2000, kuna saabsan Wakaalada W/ (PUNA.     Bogga. 24


### Qaybta Labaad

### Xeer


- Xeer sharci Madaxweyne L.1 ee 5 Jannaayo 2000 kuna saabsan masuulnimada Wasaarada cadaaladda ee garsoorka Puntland     Bogga. 28


### Qayta Saddexaad

Talooyin , Isgaarsiin, Ogaysiis IWM.

**Waxba ma leh**

DAWLAD G.
PUNTLAND EE
SOOMAALIYA

PUNTLAND STATE OF
SOMALIA

Xafiiska Madaxweynaha

Office of the President

---

Tix:______________

QaanuunLam. 2
Kuna saabsan Horumarinta Daaqa

# Madaxweynaha Dawladda Puntland

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay | Axdiga Dawlada G.Puntland |
| Markuu Tixgeliyay | Barnaamijka D.G.Puntland ee ku saabsan Horumarinta Daaqa. |
| Markuu Tixgeliyay | Baahida loo qabo in la sameeyo Qaanuunlagu dhaqo Daaqa. |
| Markuu Akhriyey | Talada Wasiirka Wasaaradda Xoolaha, Beeraha & Deegaanka. |
| Markuu Dersay | Dhibaatooyinka qaanuunla'aaneed ee ka jira dhul daaq-simeedka Dhulka Puntland. |

## WUXUU XEERINAYAA

**Qaanuunkan soo socda:-**

## Qodobka 1aad
## Seero-Xiliyeed

1. Golaha Xukuumad isagoo la tashanaya Wasiirka Wasaaradda Xoolaha, Beeraha & Deegaanka iyo Guddoomiyayaasha Gobollada iyo Degmooyinka wuxuu go'aamin karaa kuna dhawaaqi karaa Xirmo-Daaq meel kasta oo ku haboon.
2. Xirmooyinka daaqa waxay u kala baxaan :-
   A. Seero-xiliyeed:- waxaa la xiri karaa wakhtiga roobku bilawdo , waxaa la furi karaa wakhtiga jiilaalku bilawdo.
   B. Seero-Kaltan Daaq:- waxaa loo daaqi karaa si wareeg ah iyadoo

Qodobka 24aadDhaqan-gal

**Sharcigaan wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu oggolaado Golaha Wakiilada uuna saxiixo Madaxweynaha.**

Cabdullaahi Yuusuf Axmed
Madaxwenaha Dawladda Puntland

Garoowe, Janaayo 5, 2000

D. Seero-Xiritaan joogto ah:- waxaa loogu talagalaa in ay si joogto ah ugu xiraato dhirta iyo ugaarta cilmi-baaristooda.

3. Xirmooyinka daaqu waa in ay leeyihiin xuduud la yaqaan.
4. Seerayaalka daaqa waxaa lagu xirayaa ama lagu furayaa qoraal rasmi ah oo ka soo baxa Wasiirka Wasaarada Xoolaha, Beeraha & Deegaanka, isagoo la tashanaya wakiiladaWasaaradda daaqa u jooga Gobollada iyo Guddoomiyayaasha Gobollada iyo Degmooyinka.
5.

A. Wasiirka Wasaarada Xoolaha, Beeraha & Deegaanka ama wakiilkiisa Wasaaradda Xoolaha, Beeraha iyo Deegaanka, isagoo la tashanaya Guddoomiyayaasha Gobolada & Degmooyinka waxay dhisi karaan Urur xoolo iyo daaq ee xirmo kasta.

B. Wasiirka Wasaarada Xolaha, Beeraha & Deegaanka wuxuu awood u Leeyahay in uu baabi' iyo ururka la dhisay haddii uu waajibaadkiisa Gudan waayo.

## Qoddobka 2aad
## Daryeelka Dhulka Daaqa

Golaha Xukuumadda isagoo la tashanaya:-

1. Wasiirka Xoolaha, Beeraha Iyo Deegaanka wuxuu awood u leeyahay in uu joojiyo kana hortago wixii keeni kara nabaad guur iyo xaalufka dhulka waqti kasta.
2. Wasiirka isagoo la tashanaya Guddoomiyayaasha Gobolada & Degmooyinka wuxuu nidaam xirmo u samayn karaa meel kasta oo looga baahan yahay.
3. Nidaaminta dhul daaqsimeedka iyo isticmaalka biyaha waxaa waaxdu qaadi kartaa tallaabooyinka soo socda:
   A. ilaalinta iyo hubinta ilaha isticmaalka biyaha sida ceelasha, berkedaha iyo durdurada iwm.
   B. Ka hortagga iyo hubinta xaalufka dhulka.
   C. Horumarinta calafka xoolaha iyo keenidda abuur cawsed waxtar u leh.
   D. In la sameeyo beero cawseed waxtar u leh xoolaha..
   E. In la sameeyo beer abuur cawseed .
   F. In la sameeyo iskaashatooyin xoolo & daaq.
   G. In la sameeyo sahan dhul-daaqsimeed.
   H. In tirakoob lagu sameeyo xoolo dhaqatada iyo xoolahaba.
4. Saraakiisha daaquna waxay xaq u leeyihiin in meel kasta dhul daaq-simeed loo aqoonsan yahay marka laga reebo meelaha la degan yahay.
   A. In la hubiyo talaabooyinka ku haboon ee lagu horumarinayo calafka Xoolaha iyo abuur badin cawseed.
   B. Maamulka isticmaalka dhulka ee qorsheysan iyadoo la waafajinayo qaanuunka.

## Qoddobka 3aad

DHULKA DAAQA

## Qoddobka 4aad
## Beeraha Dawladdu Sameysan karto

1. Markii la dhegeysto talada waaxda deegaanka wasiirku wuxuu amri karaa beeraha hoos ku cad:-
    A. Beerta calafka xoolaha & neerseriga meesha ku haboon.
    B. Beero tijaabo iyo tababareed.

## Qoddobka 5aad
## Horumarinta Biyaha

1. Waxaa la ogaaday in biyaha loo isticmaalo si aan xadeysnayn ayna waxyeelo u geystaan dhulka daaqa iyo horumarinta xoolaha waa in wasaaradddu ka qaado talaabooyin ku haboon isticmaalka biyaha, Barkedaha, Baliyada, waraha & ceelasha.
2. Waa in ay Wasaaradda Hawlaha Guud & Wasaaradda Xoolaha, Beeraha & Deegaanku kawad tasahadaan meelaha ku haboon berkadaha,waraha & ceelasha ee dhul daaqsimeedka, arintani ma quseyso dhulka magaalooyinka.
3. Dhamaan isticmaalka biyaha barkadaha,waraha & ceelasha waa in ay haystaan shati ay bixisey Wasaaradda Xoolaha, beeraha & Deegaanka , waaxda deegaanku waxay awood u leedahay in baabi'iso meelaha laga sameeyay barkadaha,waraha & ceelasha hadii ay dhibaato u keenayaan dhulka daaqa iyagoo la tashanaya Guddoomyayaasha Gobolladda & Degmooyinka.
4. Ruqsad kasta oo biyood oo la bixinayo waxay ku xiran tahay goobta laga sameeynayo.Waa in labadii goobood ee biyood ee kasta ay isu jiraan ugu yaraan 30km ee meelaha horumarinta daaqa.
5. Berkadaha hal meel oo daaq ku yaala waa inaanay ka badnaan 20 ilaa 25 berkadood Wasiirka Wasaradda Xoolaha, Beeraha, & Deegaanka markii uu qaato talada Waaxda Deegaanka wuxuu awood u leeyahay in uu baabi'iyo, wareejiyo ama isu dhoweeyo goobaha biyaha ( Berkadaha,Waraha,Ceelasha) hadii aanay faa'iido ugu jirin dalka.
6. Cidkasta oo ceel ka qodeysa dhulka reer miyiga ama sameyneysa waro iwm, waa in ay la tashato Wasaaradda Xoolaha, Beeraha & Deegaanka.

## Qoddobka 6aad
## Diiwaangelinta Biyaha(Ceelasha,Berkaddaha IWM)

1. Dhamaan ilaha biyaha sida ceelasha,berkaddaha,waraha iwm , waa in la diiwaangeliyo lana siiyo Lambar ku gooniya Gobol kasta.
2. Habka diiwaangelinta ilaha biyaha (berkaddaha,ceelasha,waraha iwm) waxaa dejinaya Wasaaradda Xoolaha, Beeraha & Deegaanka.
3. Khidmadda diiwaangelinta waxay noqonaysaa 100,000 Sh.So(Boqol kun Shilin Somali) halkii ilbiyoodba.

## Qoddobka 7aad
## Dakhliga Ka Imanaya Daaqa

1. Si loo horumariyo daaqa waa in loo helo ilo dhaqaale.
    A. Dhaqaalahaas wuxuu ka iman karaa xaga dawladda, hay'addaha caalamiga ah ama khidmaddaha laga qaado goobaha daaqa, wax soo saarka calafka xoolaha & ganaaxa laga qaado ku xadgudubka ugaadha.

2. Dakhliga ay qaado Wasaaradda Xoolaha, Beeraha & Deegaanka waa in la waafajiyo qaanuunka maaliyadda ee dawladda.

## Qoddobka 8$^{aad}$
## Khidmadaha Calafka xoolaha

A. Ogolaanshaha noocyada calafka xoolaha ee loo uruuriyay in laga gado xoolaha dalka ama loo uruuriyay in la dhoofiyo khidmadda ogolaanshohoodu waxay noqoneysaa:-

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1. | 50,000 Sh.so | 3 tan ilaa 5 tan | baabuurta ah |
| 2. | 100.000 Sh.so | 6 tan ilaa 8 tan | baabuurta ah |
| 3. | 150,000 Sh.so | 9 tan ilaa 15 tan | baabuurta ah |

B. Gannaaxa xoolaha gala seerayaasha(Xirmooyinka) wuxuu noqonayaa :-

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1. | Geela | 500 Sh.so | tuludii |
| 2. | Lo'da | 200 Sh.so | neefkii |
| 3. | Ariga | 100 Sh.so | neefkii |

1. Waaxda deegaanku waxay iibin karaan ama bandhigi kartaa caws kasta la keenay ama laga cararay waxayna ku iibin kartaa qandaraas dakhliga waxaa laga shubayaa koontada Wasaaradda Maaliyadda .
2. Wasaaradda Xoolaha, Beeraha & Deegaanka waxay awood u leedahay in ay u dejiso khidmad kasta oo macquul ah berkadaha , ceelasha iwm, taasoo si toos ah uga imaaneysa waaxda deegaanka.

## Qoddobka 9$^{aad}$

1. Wasiirka ama qofkii u xilsaaran wuxuu bixin karaa shatiyo dhamaan qaybo ka mid ah qaanuunkan.
2. Wasiirka , Agaasimaha Guud ama Wakiiladoodu waxay baabi'in karaan ama jooojin karaan shatiyadii la bixiyey hadii loo baahdo.
3. Qofkasta oo balaariya ama baabi'iya shatiga la siiyey iyo xuduudaha waxaa loo aqoonsanayaa qof ku xadgudbay qaanuunkan.

## Qoddobka 10$^{aad}$
## Awoodd Baaridda & Qabashada

1. Ilaaliyayaasha daaqa ugaadha iyo madaxda booliska ama cidkasta oo awood loo siiyo waxay xaq u leeyihiin in ay qabtaan,baaraan, xiraan qofkasta oo ku xad gudba qaanuunka isla markaana la horgeeyo Maxkamaddaha awooda u leh

## Qoddobka 11$^{aad}$
## Ciqaabta iyo Gannaaxa

1. Qofkasata oo ku xadgudba qaanuunka wuxuu mutaysanayaa muddo 6 bilood ilaa 9 bilood oo xarag ah ama gannaax ah ilaa 3,000,000 ilaa 6,000,000.
2. Hadii gefka laga galo xarunta baadhida ciqaabta waxay noqonaysaa 500,000 ilaa 250,000 ama xarig 6 bilood ilaa sanad.
3. Qofkasta oo isku daya in uu bedelo ama baabi'iyo mid kasta oo ah shatigan ama ogolaansho u doona waxaa laga reebayaa haysashada shatigan ku xusan qaanuunkan muddo afar bilood ah ama shatiga ayaa dib loogala noqonayaa.

4. Qofkasta oo kari waaya in uu kasaaro hantidiisa markaa ka dib waxay isu bedelaysaa hanti dawladeed waana laga xaraashayaa.

**Qoddobka 12$^{aad}$**

**Ruqsaddaha**

1. Dhamaan ruqsaddaha shatiyada ogolaansho ama sharciyada ku saabsan seero-daaqsimeedka, ama beeraha calafka xoolaha ee ay iska laahaayeen iskaashtooyinka ama dad gaar ah waxaa la siinayaa ruqsaddo qaanuun ah, qof kasta oo sidaa doonaya waxaa la siinayaa muddo lix bilood guddohood ah.

**Qoddobka 13$^{aad}$**

Madaxweynaha marka uu la tashado Wasiirka ayuu wuxuu soo saarayaa xeer nidaamiye qaanuunkan si loo fuliyo ujeeddada qaanuunkan.

**Qoddobka 14$^{aad}$**

Qaanuunkan wuxuu dhaqan gelayaa 15 casho gudohood marka golaha Wakiiladu ogolaado ,uuna saxiixo Madaxweynaha ,laguna soo saaro faafinta rasmiga ah iyadoo lagu darayo ururinta rasmiga ah ee Xeerka Dawlad Goboleedka Puntland.

**Garoowe. 23 Janaayo. 2000**

Md.C/llaahi Yusuf Axmed
Madaxweynaha Dawladda